

Jawaabta Ku aadan COVID19 ee Brown County

Baaritaanka COVID19 adigoo Gaarigaada Ku sugan

Muhiimad. Goobta baaritaanka waxaa loogu talagalay oo keliya shakhsiyaadka ku nool ama ka shaqeyya Wisconsin ee leh astaamaha cudurka COVID-19

Fadlan hoos ka fiiri liiska calaamadaha u-qalma baaritaan iyo macluumaadka kale ee muhiimka ah.

Fadlan imow goobta baaritaanka 1-saac gudaheeda kaasoo ah waqtigii aad adiga dooratay. Waa inaad ogaataa waqtiga sugitaanku wuu ka badan karaan waqtiga aad dooratay

Fadlan dib u eeg xiliyada banaan islamarkaana guji badhanka si aad isu qorto. Boos gaar ah ayaa looga baahan yahay shaqsi kasta oo u qalma baaritaanka

Mahadsanid!

SU'AALAHA HAD IYO JEER LA ISWAYDIIYO

S: Sideen ku ogaanayaa inaan u qalmo baaritaanka?

J: Haddii aad ku nooshahay ama ka shaqeyso Wisconsin oo aad leedahay mid ka mid ah calaamadaha soo socda, waxaad u qalantaa baaritaan bilaash ah oo ballan ayaad qabsan kartaa

- Qandho, cabirka heerkuleeda ka badan yahay 100.4 ° darajo
- Qandho aan badnayn (tusaale, haddii qofku kulul yahay marka la taabto, ama uu dareeno inuu qandhanyahay asagoo adeeg sanaya khibradihii hore ee ku oгаа qandhada)
- Qufac
- Naqaska oo kugu dhaga ama neefta oo kugu adkaato
- Cuna xanuun
- Madax xanuun
- Qadhqadh ama dhaxan (gariirka qabowga ama dhaxanta)
- Murqa xanuun (myalgia)
- Urta oo kaa tagta/ba'da



Jawaabta Ku aadan COVID19 ee Brown County

S: Sidee ayuu u ekaan doonaa nidaamka baarista?

J: Howshu waxay ka koobnaan doontaa in shaqsiyaadka la baarayo uu ku sugnaado gaarigiis (gaariga dhaxdiisa). Waxaa jira dhowr su'aalood oo heerka baaritaanka ah oo la weydiin doono dhammaan shaqsiyaadka la baarayo. Mar haddii tan la dhammeeyo, ayaa la qaadi doonaa baaritaanka neef marinnada.

S: Maxaan sameeyaa ka dib marka aan maro nidaamka baaritaanka?

J: Fadlan tixraac macluumaadka lagu siiyay xiliga baaritaanka taasoo ah talaabooyinka xiga ee ugu ammaansan. Guriga joog si aad u yareeyso faafitaanka ilaa aad ka heleyso jawaabtaada.

S: Miyuu jiraa qof ku hadla luuqadayda ee jooga goobta baaritaanka?

J: Waxaan goobta baaritaanka joogi doona turjubaano luuqadaha kala ah Spanish, Hmong, Somali iyo Luqaddaha kale ee looga baahan karo qof walba inuu fahmo nidaamka baaritaanka.

S: Sidee ugu dhakhsaha badan oo aan ku heli doonaa natiijooyinka baaritaankayga?

J: Qof ayaa kula soo xiriiri doona ilaa iyo 3-4 maalmood gudahood si uu kuugu soo sheego natiijada baaritaankaaga. Natiijooyinka waxay ka imaan doonaan goobta aad ka hesho caafimaadka ama qof ka socda waaxda caafimaadka dadwaynaha.

S: Xagee bay dadku aadi doonaan ama lagu karantiili doonaa marka cudurka laga helo hadii aysan heli karin guri, ama ay hoy la'aan yihiin?

J: Waxaa jira qorshooyin la diyaariyay oo ah goobo loogu talagalay karantiilka - fadlan la hadal qof waqtiga baaritaanka haddii aad wax walwal qabtid

Brown County waxay bixisaa baaritaanka iyadoo ay ugu wacan tahay faafitaanka COVID-19. marka aad gudbisoo magacaaga iyo cinwaanka emaylkaaga, waxaad oggolaaneysaa inaad qabsato waqti baaro. Waxa kale oo aad qiraysaa in soo gudbinaysaa ilaalinta buuxda ee xuquuqda HIPAA, laakiin waxaa loo bixiyaa dadaal wanaagsan oo niyad sami ah si loo ballaariyo baaritaanka iyadoo la sii wado kala fogaanshaha bulshada. Nidaamkan is-diiwaangelinta hadafkiisu ma ahan in lagu aruuriyo macluumaadka astaamaha gofka ama macluumaadka caafimaad ee kale, marka laga reebo magacaaga iyo cinwaanka e-maylkaaga.

